


# Aan si WADAJIR AH u difaacno xaquuqda

## Ku biir Advocacy Pod.

© Lisa Bontje Photography

### Waa maxay Advocacy Pod?

Advocacy Pod waa koox ka kooban xirfadlayaasha barbaarinta ubadka (adeeg bixiyaasha daryeelka carruurta, waalidiinta, Daryeelayaasha Qoyska, Saaxiibada iyo Dariska, shaqaalaha CCR iyo xubnaha gudigga, iyo iskaashato ka socoto ururada waxbarashada ubadka) kuwaasoo dhammaantood ku nool degmo doorasheed iskumid ah.
Kooxda difaaca xaquuqda ee CCR ayaa abaabusha fursado ay kooxuhu kula kulmayaan xildhibaanada deegaankooda ayna toos ula wadaagayaan caqabadaha jira iyo isbadallada loo baahan yahay in la sameeyo si loo taageero carruurta degaanadeena. Tani waa fursad aad ku sheegayso fikirkaaga aadna la wadaagayso dadka la doortay si loo abuuro isbadal! Xubnaha Advocacy Pod ayaa heli doona casuumaado joogto ah oo ay kusoo bandhigayaan sheekooyinkooda ayna uga qaybgalayaan difaaca danaha carruurta.

### Waa maxay sababta aan ugu biiraayo?

Waa fursad aan iskugu imaan karno deegaanka aana toos ugala hadli karno xildhibaannada la doortay caqabadaha jira iyo isbadallada aan doonayn inaan ku aragno nidaamkeena barbaarinta ubadka. Qofkee ku biiri kara?
Codkaagu waa aalad muhiim u ah isbadalka!
Waxaan sidoo kale filaynaa xariiro wanaagsan ood la yeelato difaacayaasha kale ee deegaankaaga aadna aqoon iyo khibrad uga hesho adoo ah difaacaha danaha bulshada.

### Qofkee ku biiri kara?

Adigga!
Waxaan doonaynaa in xubnaheena adeeg bixiyaasha daryeelka carruurta (Daryeellada xarunta lagu baxsho iyo daryeelka Carruurta ee Qoyska), waalidiinta, Daryeelayaasha Qoyska, Saaxiibada Iyo Dariska (FFN), shaqaalaha CCR iyo xubnaha gurigga, iskaashatada bulshada iyo xirfadlayaasha si aad ugu biirto barnaamijkeena Advocacy Pod.

### Waa maxay higsiyadu?

Looma maaha khibrad hore ood u lahayd u doodista danaha carruurta - sida aad tahay ayaa lagugusoo dhawaynayaa! Waxaan codnaynaa inaad keento dareenkaaga buuxa iyo doonistaada inaad nala wadaagto khibradahaaga adoo ah waalid, adeeg bixiye, daryeele, xubin kamid ah bulshada ama xirfadle ka shaqeeya barbaarinta ubadka.
Fadlan samee ilaa xadka aad awoodo si aad uga qaybgasho kulannada Advocacy Pod (oo caadiyan socda 30) ood la galayso xildhibaannada, iyo inaad sidoo kale la kulanto xubnaha kale ee kooxdaada (ood oonleen ahaan ku kulmaysaan 20-30 daqiiqo) si aad ugu diyaar garoowdo kulanka kahor.

Si aad isu diiwaan geliso, iskaan garee QR code ama booqo:
**qrco.de/AdvocacyPod**

SCAN ME